

Address
Address
Address

Taariikhda

Akoonka #

Xubnaha Sharafta leh:

Aafa cudurka COVID wuxuu hadda jirsaday sanad wuxuuna ku adkaa in badan oo xubnaheenna ka mid ah. Dakota Electric Association waa adeeg muhiim ah waxaan ka ciyaar naa door muhiim ah maadaama aanu nalka idiin shidno idinka xubnaheenna ah. Bilowgii afaafa cudurka COVID, waxaanu si ku meelgaar ah u joojinay dhammaan khidmadaha lagu soo dallaco marka bixinta biilka lala daaho iyo ka goynta si aan u caawinno xubnaheenna inta lagu jiro wakhtigan.

Dakota Electric iyo adeegyada kale ee nidaamsan waxay la shaqeynayaan Minnesota Public Utilities Commission waxayna **dib u bilaabi doonaan howlihii soo aruurinta biilasha oo ay ka mid yihiin ka goynta iyo ku soo dallicitaanka khidmadaha biilasha lala daaho iyadoo lagu salaynayo xaaladda akoonka.** Qorshaheenna waxaa ka mid ah taariikhahan muhiimka ah oo adinka saamayn idinku yeelan kara:

- Juun 1, 2021: In la bilaabo ogeysiinta ka goynta xubnaha akoonkooda biilkiisa wakhtigii la bixin lahaa dhaafay.
- Ogosto 2, 2021: Dib u bilaabista ka goynta iyo ku soo dallicitaanka khidmadaha biilasha xilligii la bixin lahaa la dhaafay hadba sida loogu baahdo iyadoo lagu salaynayo xaalada akoonka laga bilaabo taariikhda la soo jeediyay ka goynta.

Akoontakaaga hadda waxaa ku jiraa kharash xilligii la bixin lahaa dhaafay. Waxaanu doonaynaa inaanu kaa caawino inaad hesho khayraad, oo ay ku jirto lacagta dowlada federaalka oo la kordhiyay sababo la xiriira aafada cudurka, taas oo kaa caawin karta inaad akoonkaaga biilka daahay bixiso. Waxaanu kugu dhiirrigelinaynaa inaad la xiriirto hay'adda gargaarka tamarta/korontada ee deegaankaaga haddii ay ku haystaan dhibaatooyin la xiriira bixinta biilka korontada.

CAP (Scott, Carver, Dakota) 651-322-3500
Three Rivers CAP (Goodhue, Rice) 1-800-277-8418
Dakota County Emergency Assistance 651-554-5611
Salvation Army 952-898-9367

Hay'adaha gargaarka korantadu waxay hayaan maalgelin xaddidan oo loo heli karo sida loo soo kala horreeyo. Sidaa darteed, waa muhiim inaad iyaga sida ugu dhakhsaha badan ula xiriirto.

Sidoo kale waa muhiim inaad nala soo xiriirto haddii aadan awoodin inaad bixiso biilkaaga. Waanu kula shaqayn doonnaa si aan akoonkaaga ugu samayno qorshe lacag bixin ah. Shaqaalaha Adeegyada Xubnaha waxaa la heli karaa Isniinta ilaa Jimcaha 7 a.m. ilaa 7 p.m. oo laga helayo 651-463-6212 ama 1-800-874-3409.

Waad ku mahadsantahay inaad xubin ka tahay Dakota Electric Association.